Ilmahaaga(carruurtaada) waxay u qalmaan SUN Bucks sanadka 2025, oo sidoo kale loo yaqaano 'Summer EBT'. The U.S. Department of Agriculture waxay dhammaan Barnaamijyada Nafaqada Xagaaga ee federaalka dib ugu habaysay inay hoos yimaadaan dallada SUN si ay u muujiso saameynta ballaaran ee fiican ee barnaamijyadu ku leeyihiin ka caawinta carruurta inay kobcaan inta lagu jiro xagaaga. Barnaamijka SUN Bucks waa barnaamij taageero cunto oo ku salaysan dakhli oo qoysaska ku siinaya $120 ilmo kasta oo jira da'da dugsiga oo u qalma si ay uga caawiyaan iibsashada raashinka marka dugsiga la fasaxo xagaagii. **Carruurta u qalma waxaa si toos ah looga diiwaangeliyaa barnaamijka, sidaa darteed uma baahnid inaad codsato.**

**Helitaanka kaarka**

Haddii aanad ku helin kaarka SUN Bucks ee ilmahaaga **45** maalmood gudahood, hubi [bogga websaydhka SUN Bucks] si aad u hesho wixi warar cusub ee barnaamijka ka soo kordha. Haddii aanay jirin wax warar cusub ah oo soo kordhay, fadlan soo gudbi [Foomka Caawinta.] Kaarku wuxuu ku imaan doonaa baqshad cad oo lagu soo codsiiyay ilmaha. Hubi in magaca ilmahaaga uu ku qoran yahay sanduuqaaga boostada. Waxa laga yaaba inaanay xafiiska boostadu kuu keenin baqshadda haddii ilmahaagu aan loo aqoonsanay qof deggan cinwaanka.

Haddii aad hesho wax ka badan hal kaar oo loogu talagalay ilmahaaga, **ha isticmaalin** dheefaha. U buuxi [Foomka Caawinta ee SUN Bucks]sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah si aad u hagaajiso khaladka oo aad u go'aamiso labada kaar midka aad isticmaalayso. Haddii ilmahaaga si khaldan dheefaha laba jeer looga siiyo in ka badan hal Dawlad Goboleed ama Ururka Qabiilka Hindida, waa inaad isticmaashaa oo keliya dheefaha ka soo baxa Ururka Gobolka ama Qabiilka Hindida uu ilmahaagu ku dhammeystiray sanad dugsiyeedkooda 2024-2025. *Xaalad kasta oo jirta **marnaba** lama isticmaali karo wax ka badan hal dheef halkii ilmoodba.*

**Sida loo isticmaalo dheefaha SUN Bucks ee ilmahaaga**

Ka dib markaad hesho kaarkaaga SUN Bucks, fadlan booqo www.ebtedge.com ama ka wac adeegga macaamiisha ebtEDGE halkan 888-997-2227 si aad u sameysato PIN-kaaga. Waxaad bilaabi kartaa inaad lacagta isticmaasho isla markiiba. Waxaa lagaa filayaa inaad dib u isticmaasho kaarkan xagaagi kasta, markaa fadlan ku hayso meel aamin ah ka dib marka dhammaan dheefaha la isticmaalo ama dhacaan. Dheefaha SUN Bucks waxaa loo isticmaali karaa dukaamada raashinka, suuqyada beeralayda iyo dukaamada kale ee la oggol yahay.

**Dhicitaanka Dheefaha**
Dheefuhu waxay dhacayaan 122 maalmood ka dib marka ay soo galaan koontada ilmahaaga. Dheefaha **lama** beddeli karo haddii ay lumaan, la xaday ama dhaceen. Fadlan booqo www.ebtedge.com ama ka wac adeegga macaamiisha ebtEDGE halkan 888-997-2227 wixii la xiriira taariikhda cayiman ee helitaanka dheefaha ilmahaaga.

**Sida loo diido dheefaha SUN Bucks**
Haddii aanad rabin inaad hesho dheefaha SUN Bucks, soo gudbi Foomka Caawinta. Waxaad heli doontaa xaqiijin iimeylka laguugu soo diro oo sheegaysa in ilmahaaga laga saaray barnaamijka dheefaha ee sannadka 2025. Ka bixitaanka sannadkan kaama hor istaagi doonto inaad hesho dheefaha sannadaha soo socda.

Nabadgelyo,
The SUN Bucks Program
Minnesota Department of Children, Youth, and Families

Riix halkan si aad u eegto Xuquuqda iyo Masuuliyadaha Macaamiisha ee Gobolka Minnesota